
# Casriyeynta Roosevelt

Macluumaadka Cusub ee Dhismaha: Dayrta 2017-ka

## Wajiga III ee Dhismaha

Dayrta 2017-ka - Janaayo 2018-ka

- Duminta Dhismayaashii asalka ahaa ee Dukaanka Dacaytirka Gawaarida, Maktabadda iyo Maqaayada
- Shaqada goobta laga qabanayo waxaa ka mid ah qurxinta dhulka bannaanka iyo goobaha cagaaran
- Dhismaha Garoonka Baseball-ka/Softball-ka
- Wanaajinta Xaq u lahaanshaha Jidka 'Right of Way' ee Dadweynaha (Waddooyinka lagu lugeeyo, Wadiiqada guriga, geedaha jidka)




## Casriyeynta Roosevelt waxay ku dhow dahay dhameystir

Bilowga sanad dugsiyeedka 2017 -18-ka, Dugsiga Sare ee Roosevelt wuxuu mar kale noqon doonaa dhisme si buuxda u shaqaynaya. Dhismaha taariikhiga ah ee la dhisay 1921-kii si buuxda ayaa loo casriyeeyay wuxuuna diyaar u yahay in la isticmaalo. Albaabka muhiimka ah ee laga soo galo iyo xafiisyada maamulku waxay ku soo noqdeen halkoodii hore. Goobaha la ballaariyay ee Dadka ka dhaxaysa iyo Barxadda Dadka Ka Dhaxaysa waa la dhameystiray. Sidoo kale waxaa lagu daray 19 fasal oo dheeraad ah, 3 shaybaarada Sayniska oo Cusub, dhowr xafiisyo oo cusub, Daryeelka Carruurta Head Start oo cusub, xafiiska ammaanka, iyo kambiyuutarada shaybaarka oo la wada isticmaalayo. Saacada la jecel yahay ee ku taala dhismaha dheer waxaa lagu sameeyay dayactir buuxa waxayna mar kale noqon doontaa saacad waqtiga tilmaanta oo shaqaynaysa.

# Wajiga III ee Dhismaha ayaa hadda socda

Wajiga 3-aad ee casriyeynta Roosevelt, oo ay qayb ka tahay, shaqo goobta laga qabanayo, qurxinta dhulka iyo duminta dhismayaasha ee maqaayada, maktabadda iyo dukaanka dacaytirka gawaawirida ee duuga ah ayaa hadda socda iyaga oo socon doona waqtiga dayrta lagu jiro. Dhameystirka Wajiga 3-aad waxaa la qorsheeyay Janaayo 2018-ka.

**Xarumaha/fasallada cusub: Oo Furmaya Ogoosto 2017-ka**

- Goobta Ardayda Ka Dhaxaysa iyo Barxadda Ardayda Ka Dhaxaysa ee la Ballaariyay
- 19 F asallada Waxbarashada Guud ah
- 3 Shaybaarada Sayniska oo Cusub
- Daryeelka Carruurta Head Start
- Kambiyuutarada Shaybaarka Oo La Wada Isticmaalayo

**Meelo cusub oo muhiim ah oo loo guurayo Sanad Dugsiyeedka 2017-18-ka:**

- Xafiisyada Maamulka iyo Imaanshaha – Wuxuu ku yaalaa dhismaha 1921, Qololka 103 iyo 105
- Xarunta Xirfada & La Talinta – Waxay ku taalaa dhismaha 1921, Marinka Dadka Ka Dhexeeya
- Xarunta Ilaha Qoyska– Waxay ku taalaa dhismaha 1921, Qolka 105F
- Daryeelka Carruurta Head Start - Wuxuu ku yaalaa dhismaha 1921, Qolka 107
- Xafiiska Kalkaalisadu - Wuxuu ku yaalaa dhismaha 1921, Qolka 106


Fasalka


Goobta Ardayda Ka Dhaxaysa/Maqaayada

# Macnaha Ay Tani u leedahay Ardayda & Shaqaalaha

## Meelaha Laga Galayo

Albaabka muhiimka ah waxaa la furi doonaa laga soo bilaabo 7:30 subaxnimo ilaa 4:00 galabnimo inta lagu gudo jiro sanad dugsiyeedka. Intaasi waxaa dheer, in albaabada laga soo galo goobta jimicsiga la xiri doono laga soo bilaabo 7:45 subaxnimo ilaa 9:00 subaxnimo. Intaasi ka dib, iyada oo ay la xiriirto ujeedooyin dhanka ammaanka ah, dhammaan albaabada ku yaala bannaanka albaabada muhiimka ah kaliya waxaa la furi doonaa waqtiyada la marayo.

**Xarunta Xirfada iyo La Talinta** sidoo kale waxaa la soo gali doonaa iyada oo la sii dhexmarayo albaabka muhiimka ah ee laga soo galo isla markaana loo socon doono dhanka Marinka Dadka Ka Dhexeeya ee midigta xiga.

**Xafiisyada Maamulka iyo Imaanshaha** waxay dhammaantood ku ooli doonaan dabaqa koowaad ee dhismaha 1921 ee qololka 103 iyo 105. Xafiisyada Maamulaha iyo Maamule Ku Xigeenku waxay ku ooli doonaan dhanka galbeed ee albaabka muhiimka ah ee laga soo galayo. Imaanshaha iyo Maamule Ku Xigeenku waxay ku ooli doonaan dhanka bari ee albaabka muhiimka ah ee laga soo galayo.

**Diiwaan hayuhu** wuxuu ku yaalaa xafiiska Imaanshaha, qolka 105B ee ku yaala dhanka bari ee albaabka muhiimka ah ee laga soo galayo.

**Xarunta Ilaha Qoyska,** Qolka 105F waxaa la soo gali doonaa iyada oo la sii dhexmarayo albaabka muhiimka ah ee laga soo galo ee ku yaala N. Central. Wakiilo ku hadla Isbaanishka ayaa laga helayaa goobtan iyo sidoo kale adeegyada qoyska iyo bulshada oo kale.

**Xarunta Caafimaadka ee Dugsiga ku-Salaysan ee Degaanka Multnomah** Qolka 115 Fadlan soo gal adiga oo soo dhexmaraya albaabka muhiimka ah ee laga soo galo isla markaana u soco dhanka marinka Xarunta Xirfada iyo La Talinta ka dibna aad Xarunta Caafimaadka.

**Xafiisyada SUN iyo Step Up** wuxuu ku yaalaa qolka 113. Waxaad gashaa adiga oo sii dhexmaraya albaabka muhiimka ah ee laga soo galo isla markaana loo socon doono dhanka marinka Xirfada iyo La Talinta.

**Goobta Cuntada ee Roosevelt** waxaa la soo gali karaa iyada oo la sii dhexmarayo albaabka muhiimka ah ee laga soo galo wuxuu ku yaalaa qolka 091.

**Agaasimaha Cayaaruhu** wuxuu ku ooli doona 056, ka soo horjeedka Goobta Jimicsiga Rasmiga ah iyo Jimciga Dheeraadka ah. Waxaad soo gashaa albaabka laga soo galo N. Burr ee ku yaala halka basku ka soo leexdo.

**Albaabada Dhanka Ammaanka** waxaa lagu soo gali doonaa kaarka shaqaalaha. Tigidhada iyo soo gelitaanka loogu talagalay dhacdooyinka cayaaraha ee bannaanka ka dhacaya waxaa laga heli doonaa albaabka jidka Burr. Musqulo iyo xarumaha cuntada lagu gado ayaa la helayaa inta ay socdaan cayaaruhu. Halka laga soo galayo ee loogu talagalay cayaaraha Kubadda laliska iyo cayaaraha kubadda kolaygu waxay sii ahaan doonaa geesta bari ee fog ee dhismaha Goobta Jimicsiga ee ku xigta goobta cuntada lagu gado.

## Gelitaanka

Gelitaanka ADA waxaa laga helayaa Albaabka Muhiimka Ah ee laga soo galo ee ku yaala N. Central. Halka laga soo galayo masraxu wuxuu ku yaalaa jidka N. Ida. Iyada oo ay albaabada kale ku yaalaan halka basku ka soo leexdo ee N. Burr.

## Cayaaraha

Kubadda baseball-ka, kubadda softball-ka waxay sanadkan ku soo noqon doonaan Roosevelt. Fadlan tababarahaaga kala tasho macluumaadkii u dambeeyay ee tababarka iyo goobaha cayaaruhu ka dhacayaan.

## Fasallada

Fasallada hada waxaa kooxo loogu kala saaray heerka fasalka la yahay ee qaybo iyo heerar kala duwan oo ku yaala dhismaha 1921. Fasallada masraxa, kooxda muusikada, suxufinimada 'journalism', PE iyo farshaxanka warshadaha waxaa lagu qabtaa xarumaha gaarka ah ee fasalka oo ku yaala guud ahaan dhismaha. Fadlan dadka kala tasho maabka ku yaala bogga 1.

## Meesha Gawaarida la Dhigto

Meesha gawaarida la dhigto ee ku taala gudaha albaabka Shaqaalaha Kaliya ayaa loogu talagalay waxaana lagu soo gali karaa kaarka shaqaalaha. Waxaa jiri doonta wado gaariga la dhigto oo loogu talagalay dhacdooyinka cayaareed oo dhan.





Qolka Kooxda Muusikada



Xarunta Caafimaadka Dugsiga

# Macluumaadkii u dambeeyay ee mashruuca, fadlan booqo website-ka Casriyeynta Roosevelt

http://RooseveltBond.pps.net




*Dugsiyada Dadweynaha Portland waa kuwo taageera dadka laga tirada badan yahay iyo shaqo bixiye loo wada siman yahay.*

HESHIISKII HAGAAJINTA DHISMAHA DUGSIGA
http://Rooseveltbond.pps.net • Telefoonka: 503-916-2222
www.facebook.com/pps.homepage @PPSConnect